DISCOVER
ITS BEAUTY

Qaybta 6aad

# WAXYIGII UGU DAMBEEYAY



DR. NAJI IBRAHIM



# Waxyigii Ugu Dambeeyay

Qur'aanka sharafta badan waa Waxyigii Ugu Dambeeyay (Kelmadii ugu Dambeysay), ee Ilaahay (Allaah) ku soo dejiyay Nebi Muxammad (Naxariista iyo Nabadgelyada Alle korkiisa ha ahaatee). Quraanku waa dastuur rabbaani oo loo soo dejiyay in lagu xakameeyo oo lagu maamulo nolosha Aadanaha.

Wuxu sheegaa aqoonta biyo kama dhibcaanka ah ee Abuuruhu Alle u leeyahay khalqigiisa. Wuxu daaha ka qaadaa xaqa waxaana uu Aadanaha ugu yeeraa dariiqa xaqa iyo toosnaanta. Waxaa ku jira macluumaad ku saabsan qaddarka iyo masiirka Aadanaha. Dadka ayuu wax baraa oo maskaxdooda, ruuxdooda, dhaqankooda iyo bulsho-la-dhaqankooda gaarsiiya heerka ugu sarreeya markay fahmaan oo ku dabbaqaan noloshooda.

Quraanku waa mucjiso abadi ah oo la siiyay Nebiga, Muxammad, oo caddayn u ah nebinimadiisa; sidaas darteed, waa khaas oo wax loo dhigi karaa ma jiraan. Inkastoo la soo dejiyay afar iyo toban qarni ka hor, illaa hadda wax iska beddelay ma jiro oo waa asalkiisii (marka uu ku qoran yahay Luuqadiisii asalka ahayd ee Carabiga).

Alle wuxu Qur'aanka noogu sheegay ***"inuu Isagu soo dejiyay Kelmadiisa Qur'aanka) oo Isagu ilaalin doono."*** (15:9)

Sidoo kale Alle wuxu Qur'aanka inoogu sheegay: ***"Waxaad dhahdaa, "Hadday u kulmaan insi iyo jinni inay la yimaadaan quraankan oo kale, lama imaan karaan wax la mida, qaarkood qaar haba caawiyeene."*** (17.88)




# Ayaado Qur'aan oo qurux badan

Qaybtan, waxaan jeclaan lahaa inaan idinkula wadaago qaar ka mid ah aayadaha quruxda badan ee ka soo burqanaya badwaynta aan gunta lahayn ee Xikmadda ah iyo Kelmada Eebbe.

Si aad wax badan uga barato kaydka quruxda badan ee saafiga ah ee Quraanka Alle, Allaha Keliya ee Runta ah, waxaan aan kugu martiqaadayaa inaad Quraanka iskaa u akhrisato. Isku day inaad hesho tafsiirka saxda ah; waxaad ka heli kartaa onlaynka boggaga Islaamka ee la isku hallayn karo. (Fadlan fiiri websaydyada Islaamka ee ku qoran dhammaadka daabacaddan).

Xaqiiqatan, dhammaan aayadaha Quraanku waa Kelmadihii Alle. Aynu akhrino oo ku raaxaysano qaar ka mid ah qaybaha la yaabka leh ee Qur'aanka Sharafta leh ee muujinaya aragtida Islaamka ee khuseeya qaar ka mid ah fikradaha iyo waxyaabaha Islaamku ina barayo ee muhiimka ah, sida:

- **Kelinimada Alle, Allaha Dhabta ah (Tawxiid)**
- **Dambi-dhaafka iyo Badbaadinta**
- **Caddaaladda**
- **Sinnaanta**
- **Caalaminimada iyo Midnimada Farriinta**
- **Allaah iyo Rasuulkiisa**
- **Xasiloonida iyo Jannada**
- **Ragga iyo Dumarka (sida Islaamku qabo)**
- **Waxyaabaha Fiifiican ee Islaamku ina Barayo**
- **Waxyaabaha La Isfaray iyo kuwa la Iska Reebay**
- **Xuska Eebbe iyo Xasiloonida Maskaxeed**



# Kelinimada Alle (Allaah) ee Qur'aanka

- *"Alle - macbuud xaq lugu caabudo ma jiro Isaga mooyee. Wuuna idiin soo kulmin maalinta qiyaame, shaki ma leh. Yaa ka run badan Alle hadal ahaan?"* (4:87)

- *"Kaasina waa Ilaahay, Rabbigiinna; ma jiro Ilaah kale isaga mooyaane, Abuuraha wax walba ee caabuda Isaga. Wax walbana isagaa u wakiil ah (ilaaliya)."* (6:102)

- *"Dadow, xusuusnaada nicmada Alle ee korkiinna ah. Ma abuure kale oo aan Alle ahayn oo idinka irsaaqi doona samada iyo dhulka ayaa jira? Alle mooyee ilaah kale oo xaq lugu caabudo ma jiro ee xaggee laydiin ka iili xaqa?"* (35:3)

- *"Alle-na waa Allaha Isaga mooyee aan ilaah kale oo xaq lugu caabudo aanu jirin. Isaga ayey [usugnatay] mahad oo dhan [adduunyada] hore iyo Aakhiro. Xukunkana isagaa iska leh xaggiisaana loo noqon."* (28:70)

- *"Allahiinu waa mid keliya. Ilaah kale oo xaq lagu caabudo ma jiro isaga mooyaane, waana midka naxariista Naxariis Guud, iyo Naxariis Gaar ahba."* (2:163)

- *Waxaad dhahdaa (Nabiyow): "Alle waa kali (wehelna ma leh). Waana sayid dhammaystiran (oo deeqtoon). Alle wax ma dhalin, isna lama dhalin. Wax la mid ahna ma jiro."* (112:1-4)

- *"Dadka lama farin inay caabudaan Ilaahay keliya mooyaane; mana jiro Ilaah kale oo aan Isaga ahayn. Waana ka nasahan yahay waxay Isaga cibaadada la wadaajinayaan."* (9:31)

Xaqiiqatan, fikradda waadaxa ah ah ee dhayda ka cad ee Kelinimada Alle (oo Carabi ah, **Tawxiid**) waa fikrad iyo mawduuc aasaasi u ah Qur'aanka.



# Dambi-dhaafka iyo Badbaadinta Eebbe ee Qur'aanka ku jirta

***"Waxaad dhahdaa Nabiyow,"Aaddoommadayda ku xad gudbay naftooda [dambaabay], ha ka quusannina naxariista Alle. Alle ayaa dhaafa danbiyada dhammaantood. Xaqiiqatan, waa dambi dhaafbadane naxariis badan."*** (39:53)

Marka naftu towbad keento oo Alle u laabato, Allaah wuu ajiibaa addoonkiisa wuuna u dambi dhaafaa. Haa, Alle wuu cafiyaa dhammaan dunuubta marka aynu si dhab ah oo daacad ah ugu toobad keeno. Alla wanaagsanaa! ***"Xaqiiqatan, Ilaahay wuxuu jecel yahay kuwa toobadda badan, wuuna jecel yahay kuwa is daahiriya."*** (2:222)

Islaamka dhexdiisa, Ilaahay waa isha nabadda, naxariista, iyo dembi-dhaafka, ee maaha isha nacaybka, dhiig-daadinta, ama argagaxisonimada.

Markaas si aan u helno badbaado iyo nolol aan dhammaanayn, keliya waxaad u baahan tahay inaad Ilaahay u towbad keento, keligii rumayso, oo aad sameyso camal wanaagsan. Ma jirto wax baahi ah oo loo qabo in qof bilaa dambi ah, oo saalix ah loo dilo ama saliib loogu daldalo si loogu gudo ama loogu tirtiro dembi ay galeen dad kale. Diinta Islaamku waxay sidoo kale dadka aaminsan (Muslimiinta) ku amartaa in ay cafiyaan dadka kale.

Tani waxay si kooban u muujinaysaa fikradda dambi dhaafka iyo badbaada towbadda ee Islaamka, diinta naxariista iyo iscafinta.



# Caddaalada Qura'anka

***"Kuwa xaqa rumeeyow, noqda kuwa u istaaga (u darban) dar Alle oo ku marag kaca caddaalad, yeyna idinku xambaarin cadhada qoom inaydaan caddaalad falin, caddaalad fala iyadaa u dhaw dhawrsashada Alle. Kana dhawrsada ilaahay, Alle waa og yahay waxaad falaysaane."*** (5:8)

Islaamku wuxu ina barayaa inaynu u caddaalad falno qof kasta, ha noqdo saaxiib amase cadoow, markasta, dagaal ha lagu jiro ama nabadi ha jirtee. Wuxuu ina barayaa inaynu ku dhaqano oo ku tacaamulno caddaalad iyo akhlaaq wanaag aanay wax shuruud ahi ku xirnayn, taas oo ka madax bannaan doonista shaqsiyeed ama fikir sheegaya in qiyamyada akhlaaqiga ahi isla beddelaan xaaladaha bulsho iyo dhaqan ee kala duwan.

***"Xaqiiqatan, Alle wuxuu idin farayaa inaad u guddaan siisaan ammaanada ehelkeeda cidda leh, oo haddii aad kala xukumaysaan dadkana inaad ku kala xukuntaan caddaalad."*** (4:58)

Iyadoo ka turjumaysa muuqaalka quruxda badan iyo qiyamka aan isbeddelayn ee naxariista iyo caddaaladda Islaamka, diinta Islaamku waxay ina faraysaa ilaalinta waxa culimada Muslimiintu ugu yeedheen **'Shanta Daruuriyaadka ah'**:

- **Diinta**
- **Ruuxda**
- **Maskaxda**
- **Sharafta (cirdiga)**
- **Lacagta iyo hantida**



Si qurux badan, ayuu Qur'aanku u tilmaamayaa in haddii qof dilo qof bilaa dambi ah oo aanu dil ku waajibin, ***"ay la mid tahay sidii inuu wada laayay dhammaan bini aadamka oo dhan. Oo ciddii noolaysa nafna — waxay la mid tahay isagoo nooleeyey dadkoo dhan."*** (5:32)

Marka laga hadlayo xoriyadda iyo ilaalinta iimaanka, Qur'aanka Kariimka ah wuxuu ina leeyahay: ***"Igraah (qasab) ma aha diinta galiddeedu..."*** (2:256)

Sidaas darteed, wuu ixtiraama Bani Aadanka oo ma oggola in qofna lagu khasbo inuu soo galo ama qaato caqiidada Islaamka. Tani waa runta, quruxda, caddaaladda, iyo dulqaadka Islaamku kula tacaamulo dadka aan Muslimiinta ahayn. Intaas waxaa dheer, Islaamku wuxuu ina farayaa inaynu caddaalad, sinnaan iyo toosnaan ku dedaalno markay dadka kala xukumayno.

Aynu xasuusano waxa Alle Qur'aanka Sharafta leh inoogu sheegayo: ***"...Oo yeyna idinku xambaarin cadhada qoom (u qabtaan) inaydaan caddaalad falin. Caddaalad fala iyadaa u dhaw dhawrsashada (Alle)."*** (5:8)

Hase ahaatee, waxa jira siyaasiyiin iyo hogaamiye diimeedyo, qoraayo, taariikhyahanno, iyo suxufiyiin si caddaalad darro ah Islaamka iyo Muslimiinta ugu eedeeya argagaxisinimo oo sheega in Islaamka lagu faafiyay seef iyo dhiig; waxaa sidoo kale jira dad Alle, Ilaaha Kelida ah ee Runta ah iyo Rasuulkiisii u dambeeyay Muxammad, si anshax xumo iyo caddaalad darro ah u soo bandhiga kana sameeyay sawirada, filimada iyo kartoonada ugu foosha xun.



# Ka Feker Su'aalahan

- Tani ma waxa xorriyadu ka dhigan tahaybaa, khaasatan xorriyatal qowlka? Miyaanay tani ahayn isdiido marka laga hadlayo Islaamka iyo Muslimiinta?
- Maxaa kelmadaha 'Argagaxisanimada/argagaxisada Kiristaanka', 'Argagaxisanimada/argagaxisada Yuhuudda', 'Argagaxisanimada/argagaxisada Hinduuga', ama 'Argagaxisanimada/argagaxisada Buudhiiska', mar iyo dhif, waaba haddii ay jirtee, looga maqlaa saxaafadda?
- Waa maxay sababta argagaxisada loogu shaabadeeyo Islaamka iyo Muslimiinta oo qudha? Ka warran argagaxisada iyo qalalaasaha ay geystaan dadka kale?
- Qof kasta ma u xorbaa inuu caayo, lacnado oo necbaado dadka kale iyo caqiidadooda, ama inuu ku eedeeyo dhammaan argagaxisonimo?
- Sidani ma qaabka ilbaxnimadaa, dimuquraadiyadda, iyo xorriyadda lagu baro jiilasha yaryar ee ku jira dugsiyada, kuleejyada iyo bulshada dhexdoodaa?
- Ma seefbaa waxa maanta rag iyo dumar badan oo caqli badan, waxgarad ah, maskax furan oo daacad ah ku riixday inay qaataan diinta Islaamka? (Waxa jira buugaag, maqaallo, sheekooyin, websaydyo, iyo muuqaallo iyo xogaha kala duwan ee baraha bulshada oo ka hadlaya sida iyo sababaha walaalahani ku qaateen diinta Islaamka. Tusaale ahaan, Waxaan ku soo jeedin lahaa barnaamijka Islaamka Annaaga Dooranay (Islam Our Choice): Sawirada Gabadha Muslimada ah ee Casriga ah, ee ay soo saaraan Debra L. Dirks iyo Stephanie Parlove.)

**Xasuusnoow: Si kastoo ay sawir xun uga bixiyaan, saxaafadda Reer Galbeedku way sheegaan in Islaamku yahay diinta ugu korriinka iyo koboca badan adduunka. Markaas waa maxay Sababta Islaamku sidaas ugu kobcayo?**



# Sinnaanta Qu'aanka

***"Dadoow, waxaan idinka abuurray lab iyo dhaddig, waxaan aan idinka yeellay shucuub iyo qabiilooyin si aad isu aqoonsataan. Xaqiiqatan, Ruuxa idiinku sharaf badan Alle (Ilaahay) agtiisa waa ka idiinku dhawrsasho badan. Xaqiiqatan Alle ayaa wax walba og."*** (49:13)

Isagoo sii adkaynaya ffikraddan sinnaanta Islaamka, Nebi Muxammad wuxuu khudbadiisii ku sheegay: ***"Dadoow, Ilaahiinu waa mid keli ah, oo isku hal aabbe ayaa tihiin. Dhammaantiin waxaad ka farcanteen Aadam, Aadamna waxaa laga abuuray dhoobo iyo carro sidaas darteed Carabku kama sarreeyo qofka Cajabka, Cajabkuna kama sarreeyo Carabka. Kiina cad kama sarreeyo ka madoow, ka madoowna kama sarreeyo ka cad. Dhammaan waad siman tihiin. Ma jirto cid dadka kale kaga sarreysa sifo marka laga reebo taqwada iyo camalka wanaagsan."***

- Islaamku wuxu ina faraya in aynaan colaadin oo ceebayn dadka kale innagoo u eegayna qowmiyadiisa, midabka maqaarkiisa, ama dhalashadiisa.
- Islaamku waa daawo dhab ah oo dabiibaysa iska hor imaadyada cunsuriyadda ku dhisan ee adduunka waajahayo.

Islaamka dhexdiisa, madoowga iyo caddaanku waa isku sinji oo waa wada walaalo. Dhammaanteen waxaynu ka soo tafiirmanay hal aabbe, Aadam, kaas oo dhoobo laga abuuray; sidaas darteed dhammaanteen waxa la innaga soo saaray dhulka waana ku laaban doonaa oo ciidda ayaynu markale dib u geli doonaa.

Casharkan muhiimka ah waxaa lagala soo baxay aayadaha kore ee Qur'aanka laga soo xigtay iyo khudbaddii Nebiga ee u dambeysay. Markaas waa maxay sababta dadka qaar u dareemaan islawayni iyo faan been ah oo ay dadka kale u hayaan?



# Caalaminimada iyo Midnimada Farriinta

Muslimiintu way jecelyihiin oo rummaysan yihiin dhammaan Anbiyada Alle, oo ay ku jiraan Nuux, Ibraahiim, Ismaaciil, Isxaaq, Yacquub, Muuse, iyo Muxammad (Naxariista iyo nabadgelyada Eebbe korkooda ha ahaato dhammaantoode).

Qur'aanku wuxuu sheegayaa:Dheh, ***"Waxaan rumaynay Alle iyo waxa naloo soo dajiyey iyo waxa lagu soo dajiyay Ibraahiim, Ismaaciil, Isxaaq, Yacquub iyo carruurtoodii iyo wixii la siiyay (Nabi) Muuse iyo (Nabi) Ciise iyo wixii laga siiyey Nabiyadii (kale) xagga Rabbigood. Kala gaynna mayno dhexdooda mana kala saarayno, waxaana u hogaansamaynaa Alle."*** (2:136)

Nebi Muxammada (Naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee) wxuu yidhi, ***"Aniga ayaa idiinku dhow nebi Ciise, Ina Maryama, sababtoo ah ma jirin Nebi aniga iyo isaga noo dhexeeyay. Nebiyada waa wada walaalo; hooyooyinkood uunbaa kala duwane, diintoodu waa hal."***

**Markaas waa maxay diintan caalamiga ah ee runta ah ee dhammaan rusushii Alle wadeen?**



# Aayadaha Kale ee Quruxda Badan ee aad ka Fekeri Karto

Quruxda, macaanka iyo saafinimada Qur'aanka Kariimka ah xad ma leh, markaas aan soo xigto qaar ka mid ah ayaadaha Qur'aanka aniga oo aan gelin wax tafaasiil dheeraada ah. Waxaan jeclaan lahaa inaad ka fekerto oo ku tadaburto ayaadahan. Isku day inaad kayd xigmadeed oo dheeraad ah ka hesho Kitaabka u dambeeyay Kutubta Alle, Qur'aanka.

- **Allaah iyo Rasuulkiisa**


***"Alle (Allaah) waa kan Rasuulkiisa ku soo dejiyay hanuun iyo diin xaq ah..."*** (48:28)

***"Ma aha (Nabi) Muxammad aabbaha ruux raggiinna ka mid ah, laakiin (waa) Rasuulkii Alle iyo kii lagu khatimey Nabiyada. Alle na wax walba waa ogyahay."*** (33:40)

- **Xasiloonida iyo Jannada**

***"Alle (Allaah) waa kan ku dajiyay xasilloonida quluubta mu'miniinta si ay iimaan ugu siyaadsadaan iimaankoodii [ay horey u qabeen]... Si uu u galiyo mu'miniinta rag iyo haweenba jannooyin ay dareereyaan dhexdeeda wabiyaal halkaas oo ay ku waari doonaan, dambigoodana wuu asturi doonaa, arrintaasina Alle agtiisa waxay ku tahay liibaan wayn."*** (48:4-5)

***"Naftase xaqa rumaysay ee xasillooneey, U noqo Allehaa adoo raalli ah lagaana raalli noqday, Dhexgalna addoommadayda (wanaagsan) oo Gal jannadayda."*** (89:27-30)



- **Ragga iyo Dumarka (sida Islaamku qabo)**

  ***"Xaqiiqatan, Ragga muslimiinta ah iyo haweenka muslimaadka ah, ragga mu'miniinta ah iyo haweenka mu'minaadka ah, ragga Alle adeeca iyo haweenka adeeca, ragga runlowga ah iyo haweenka runloowga ah, ragga samra iyo haweenka samra, ragga u khushuuca Alle iyo haweenka u khushuuca, ragga sadaqaysta iyo haweenka sadaqaysta, ragga sooma iyo haweenka sooma, ragga isdhawra iyo haweenka isdhawra, iyo ragga in badan Alle xusa iyo haweenka in badan xusa, wuxuu Alle u darbay dambi dhaaf iyo ajir weyn."*** (33:35)

  ***"Ruuxii fala wanaag ee lab ah ama dhadig isagoo rumeysan (xaqa) kuwaasu waxay gali jannada..."*** (4:124)

- **Waxyaabaha Fiifiican ee Islaamku ina Barayo**

  ***"Una degdaga dambi dhaafka Allihiin iyo beer [sidookale, janno] ballaadhkeedu yahay Samaawaadka iyo Dhulka, oo loo diyaariyay kuwa dhawrsada, ee wax bixiya waqtiga ladnaanta iyo dhibkaba, ee damiya cadhada ee iska cafiya dadka-Allena waa jecel yahay samafalayaasha; Kuwa markay falaan xumaan ama dulmiyaan naftooda xasuusta oo xusa Alle, kana dalbada dambi dhaafi-wax dambi dhaafa oo aan Alle ahayn miyaa jira? - iyo [kuwa ]aan daa'imin xumaantay faleen iyagoo og. Kuwaas - abaalkoodu waa dambi dhaafka Rabbigood iyo jannooyin ay dareerayaan dhexdeeda wabiyaal iyagoo ku waari doona dhexdeeda. Waxaa wanaagsan abaalka kuwa camal [wanaagsan] falay."*** (3:133-136)



# Aayadaha Kale ee Quruxda Badan ee aad ka Fekeri Karto (socd.)

- **Waxyaabaha La Isfaray iyo Waxa la Iska Reebay**

  ***"...Ha caabudin Alle mooyee cid kale, una sama fala labada waalid iyo qaraabada, agoonta, masaakiinta oo dadkana hadal wanaagsan kula hadal..."*** (2:83)

- **Xuska Eebbe iyo Xasiloonida Maskaxeed**

  ***"Kuwa rumeeyey xaqa ee ay quluubtoodu ku xasishay xuska Alle. Shaki la'aan, xuska Alle ayay ku xasishaa quluubtu."*** (13:28)

Xaqiiqatan, runta, faa'iidooyinka, iyo cajaa'ibka Qur'aanka Sharafta leh dhammaad ma leh. Markasta oo aad akhriskiisa sii badiso, wax cusub oo dheeraad ah ayaad ka dhex helaysaa, markasta oo aynu akhrino, waxaynu dareemaynaa inaynu Qur'aanka markii koobaad akhrinayno.

Waxa jira dhinacyo kale oo badan oo cajiib ah oo Qur'aanku leeyahay, sida saxiixnimadiisa, baalaqadiisa luuqadeed, aqoontiisa saynis, iyo daawooyinkiisa caafimaad, kuwaas oo aynaan halkan kaga hadlin si qoraalku u koobnaado.



# Ma xiisaynaysaa inaad wax dheeraad ah sii ogaato?

Haddii aad xiisaynayso inaad ogaato macluumaad iyo tafaasiil dheeraad ah oo ku saabsan Islaamka, fadlan booqo shabakadayada:

**www.discoveritsbeauty.com**

**Taxanaha Lagu Soo Bandhigayo Quruxda Islaamka:**

**1. Kaliya Tallooyinka Aysbaaga**

**2. Diinta Aadam Iyo Xaawo**

**3. ABC-yada Islaamka**

**4. Ka Jawaabista Su'aalaha Muhiimka Ah Ee Aadanaha**

**5. Magacyada Quruxda Badan Ee Ilaahay**

**6. Waxyigii Ugu Dambeeyay**

**7. Rasuulkii Ugu Dambeeyay**

**Shabakado IslaamI Ah Oo Faa'IIdooyin Badan Leh:**

http://www.allahsquran.com

http://www.quranexplorer.com

http://www.islamhouse.com

http://www.edialogue.org

http://www.islamreligion.com

http://www.newmuslimguide.com

http://www.guidetoislam.com/en/

# Qiritaanka iimaanka
## (Albaabka Islaamka)

"Waxaan qirayaa in uusan jirin mid xaq lagu caabudo Ilaahay mooyee, waxaana qirayaa in Muxammad uu yahay Rasuulkii Ilaahay".

Carabi ahaan, waxaa loo akhriyaa:

أشهد أن لا إله إلا الله وأشهد أن محمدا رسول الله

Oo sidaan loogu dhawaaqo:

**ASH-HADU ALLA ILAHA ILLA ALLAH,**
**WA ASH-HADU ANNA MUXAMMADAN RASUULU ALLAH.**

Tani waa qirida iimaanka ee loo baahan yahay inuu qofku ku dhawaaqo si uu u Islaamo; waxay soo koobaysaa xaqa, quruxda, iyo sahalka Islaamka.



DISCOVER

ITS BEAUTY

www.discoveritsbeauty.com

ka daabaco sawir

GLOBAL ACADEMY FOR TRANSLATION AND EDUCATION (GATE)
LONDON | THE UNITED KINGDOM

Waxaa Turjumay Al-Andalus Group LTD
www.alandalusgroup.org

كتاب الوحي الأخير باللغة الصومالية